Nationwide Children's
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Burooyinka: Daaweynta Nitrogen-ka dareeraha ah

# Warts: Liquid Nitrogen Treatment (Somali)

Burooyinka waa koror ku yimaada maqaarka oo uu keeno fayras. Waxay ku kala duwan yihiin cabirkooda iyo muuqaalkooda. Burooyinka waxay inta badan ku dhacaan gacmaha ama cagaha, laakiin waxay ku dhici karaan meel kasta oo maqaarka ah. Waxay ku faafaan qof ilaa qof taabashada. Burooyinka qaarkood waxay ku baaba'daa isbuucyo ama bilo gudahood haddii aan la daweyn, laakiin qaarna waxay socon kartaa sanado.

## Waxa La Filan Karo

Burada ilmahaaga waxaa laga yaabaa in lagu daaweeyo nitrogen dareere ah. Nitrogenka dareeraha ah wuxuu qabookiyaa oo uu burburiyaa burada iyo qayb yar oo maqaarka ku wareegsan.

- Dhalada buufinta ama suufka waxaa loo isticmaalaa in lagu dhigo dareere nitrogen ah burada korkeeda. Waxay qaadataa 10 illaa 20 ilbiriqsi in la isticmaalo. Nitrogen-ka dareeraha ah waa qabow. Waxay u ekaan kartaa in baraf uu ku dhacay ama in baraf uu maqaarka ku dhegay. Marka uu maqaarka uu kululaanaya (dhalaalaya), waxaa laga yaabaa inaad dareento kuleyl ama sidii inay ku gubanaysa oo kale.
- Qaar ka mid ah burooyinka aad bay u qaro weyn yihiin. Maqaarka sare ee dheeraadka ah waa in laga saaraa si daaweyntu sifiican ugu shaqeyso. Dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa sameynaya tan.
- Goobta lagu shubo nitrogenka dareeraha ah waxaa ka dhalanaya qolof ama xumbo. Waxay qaadan kartaa waqti dheer in la sameeyo iyada oo ku xidhan halka ay ku taalay


©1992, dib loo eegay 2025, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

burada iyo sida maqaarka ku wareegsan yahay. Nabarka wuxuu noqon karaa mid nadiif ah ama uu dhiig ka buuxo. Tani waa caadi.

- 4 ilaa 7 maalmood kaddib, nabarka ama googo'a ayaa jebi doonta ama qallali doona oo dhici doonta. Meeshu waxay noqon kartaa mid xanuun leh.
- Daaweynta caadi ahaan dhaawac kama dhasho. Goobta la daweeyay waxaa laga yaabaa inay caddaan u muuqato dhowr bilood si ay u noqoto mid caadi ah. Hadii ay ku wareegsan tahay cidiyaha, waxaa laga yaabaa in isbedel ku yimaado cidiyaha muddo gaaban, sida qodxan.
- Burooyinka badankood waxay u baahan yihiin in dhawr jeer lagu daweeyo nitrogen dareere ah, iyadoo 4 ilaa 6 todobaad ay u dhaxeyso daweynta. Tirada daaweyntu waxay ku xiran tahay xajmiga burada iyo sida ay daaweyntu ugu habboontahay.
- Dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadku wuxuu u isticmaali karaa daawo kale inta u dhaxaysa daaweynta. Daawadu waxay noqon kartaa mid aan dhakhtar kuu qorin ama dhakhtar kuu qoro. Waxay ka caawineysaa daaweyntu inay si fiican u shaqeyso. Sug ilaa uu ka baxaaya cuncunka ay keento nitrogen-ka dareeraha ah ka hor intaadan isticmaalin daawada.
- Burooyinka badankoodu waxay ku baxaan daaweynta nitrogen-ka dareeraha ah. Burada ayaa sii weynaan kara, ama burooyinka yaryar ayaa ka dhalan kara agagaarka meesha la daaweeyay. Tani waa dhif.

## Waxa la Sameynayo

- Si joogto ah maalin walba saabuun iyo biyo ugu maydh meesha la daweeyay. Haddii uu weli jiro nabar ama qolof, si fiican u qalaji meeshaas oo ku dabool faashad. Hadii uu ka dillaacay nabarka ama uu ka soo qolofta, si fiican u qalaji meesha oo ku shub suuxinta laba jeer oo antibiyootiga (Polysporin®) ama saddex jeer oo antibiyootiga ah (Neopsorin®). Ku dabool goobaha faashad.
- Sii acetaminophen (Tylenol®) ama ibuprofen (Advil® ama Motrin®) ubadkaaga hadba sida loogu baahdo xanuun. Akhri calaamadda si aad u ogaatid qiyaasta saxda ah. **Ha siin aspirin ama wax kasta oo ay ku jirto aspirin.**

## Goorma ayaa la wacayaa dhakhtarka

Infekshannada ka dib daaweynta ma aha mid caadi ah. Wac dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii:

- Ay leeyihiin qandho 100.4˚ Fahrenheit (F) ah ama 38˚ Celsius (C) ah ama ka sareysa.
- Nabarka uu furmayaa daweynta kadibna uusana bogsaneyn.
- Nabarka waa guduudan yahay, wuu bararsan yahay, wuxuu dareemayaa kulayl, ama wuxuu ka soo baxayaa maal.